


Isticmaalka Dheefahaaga Miraha iyo khudaarta Special Supplemental Nutrition Program for Women, Infants and Children (WIC, Barnaamijka Nafaqada Dheeraadka ah ahna Gaarka ee Dumarka, Dhallaanka iyo Carruurta) ee Suuqyada Beeralayda iyo Dukaamada Beeraha

Farmers Market Nutrition Program (FMNP, Barnaamijka Nafaqada Suuqa Beeralayda) 2023 iyo Dheefaha Miraha iyo Khudaarta


# Laba Nooc oo ah Dheefaha Miraha iyo Khudaarta WIC



## Farmers Market Nutrition Program (FMNP)

Arag dheefahan lagu diwaangaliyay App-ka WICShopper sida Miraha iyo khudaarta - *FMNP*

- Waxa kaliya oo aad dheefahan ku isticmaali kartaa suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha la ogolyahay.
- Dheefaha FMNP waxaa lagu daraa kaarkaaga WIC hal mar xilliga (June 1 - Oktoobar 31).



## Dheefaha Miraha iyo Khudaarta

U arag faa'iidooyinkan ku qoran App-ka WICShopper sida *Fruit iyo Veg – WIC*

Kahor Juun 1, 2023, waxaa laguu ogol yahay oo kaliya inaad dheefahaaga miraha iyo khudaarta ku isticmaasho dukaanka raashiinka.

- Kadib Juun 1, 2023, waxaad dheefahan ku isticmaali kartaa dukaanka raashinka adigoo isticmaalaya kaarkaaga WIC iyo suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha ee la ogolyahay ee leh koodhka (QR) ee Jawaabta Degdega ah.
- Isticmaal dheefahan inta lagu jiro mudada dheefaha bilaha ah (Taariikhda ugu horeysa ee aad qarashgareyso ilaa taariikhda ugu danbeysa ee aad qarashgareyso).

# Hab Cusub oo aad wax ugu iibsan kartid Dheefahaaga FMNP iyo Dheefahaaga Miraha iyo Khudaarta


- Dheefaha FMNP iyo Dheefaha Miraha iyo Khudaarta waxay kuu oggolaanayaan inaad khudaar iyo miro cusub ka iibsato suuqyada beeralayda ama dukaamada beeraha la ogolyahay.
  - **Xusuusnoow:** Markaad hore ugu sii socoto sawirada, dhammaan tixraacyada suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha waxay macnaheedu tahay waa suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha la ogolyahay oo kaliya.
- Mar danbe ma heli doontid jeegag warqad ah oo loogu talagalay dheefaha FMNP.
- Sannadkaan waxaad heli doontaa istiikarka koodhka (QR) ee Jawaabta Degdegga ah.
- QR Koodhka WIC wuxuu ku sahlayaa helitaanka dheefahaaga FMNP iyo dheefaha miraha iyo khudaarta adiga iyo qoyskaaga.
- Baro sida loo isticmaalo QR koodhka WIC ee suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha adoo dib u eegaya boggaga soo socda.



# Hab Cusub oo aad wax ugu iibsan kartid Dheefahaaga FMNP iyo Dheefahaaga Miraha iyo Khudaarta

Siyaabo badan ku keydi QR koodhkaaga WIC si aad u hubiso inaad haysato marka ay tahay wakhtiga aad wax ka iibsanayso suuqa beeralayda ee WIC ee deegaankaaga ama dukaanka beeraha!

- Keydi istiikarada QR koodkaaga ama daabac
  - Ku dar Kaarkaaga WIC
  - Sawir ka qaad QR koodka si aad ugu kaydiso taleefankaaga.
  - limayl isu dir oo ah sawirka kaadhka QR-ka ama ku kaydso Google kaaga ama Apple Wallet.



# Wax iibsiga WIC ee Suuqa Beeralayda ama Dukaamada Beeraha


- Ogoow meesha wax laga iibsado
- Ogoow waxa aad iibsanayso
- Ogoow Inta Aad Kharash Garayn Karto
- Ogoow sida loo isticmaalo dheefahaaga
- Ogoow goorta aad wax iibsanayso




# Halka aad wax ka libsanayso

- 1) Raadi calaamadda: WIC & Senior Farmers Market Benefits WELCOME HERE (WIC & Beeralayda Sare Dheefaha Suuqa KU SOO DHAWAADA HALKAN)!

- Markaad aragto calaamadan, waxaad ogaan doontaa inaad ka iibsan karto miraha iyo khudaarta deegaanka lagu beeray ee cusub, suuqan la ogolyahay ee beeralayda ama dukaanka beeraha adigoo isticmaalaya dheefahaaga WIC.



- 2) Waxaad isticmaali kartaa App-ka  WICShopper si aad u hesho suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha ee kuu dhow ee la ogolyahay.



- 3) Ka eeg [Webseedka FMNP](#) si aad u hesho liiska suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha ee la ogolyahay.

# Ogoow waxa aad iibsanayso

- U isticmaal dheefahaaga FMNP iyo dheefahaaga Miraha iyo khudaarta kaliya wax soo saarka deegaanka lagu beero.
- Beeralayda leh calaamadaha "WIC & Senior" waxaa loo ansixiyay wax soo saarka gudaha deegaanka. Wax soo saarka waxaa lagu beeraa Washington ama gobollada xadka ee Oregon iyo Idaho.
- Doorro:
  - Miro cusub
  - Khudaar cusub
  - Dhirta la jarjaray oo cusub



# Ogoow Waxa Aad Iibsanaayo

Uma **isticmaali** kartid dheefaha FMNP ama dheefaha Miraha iyo khudaarta cuntada la diyaariyey ama waxyaabaha aan cuntada ahayn sida:

- Malab
- Miraha la qalajiyay
- Khudaarta la qalajiyay
- Ukunta
- Caanaha
- Hilibka
- Cuntada badda
- Lawska ama abuurka
- Jams-ka
- Ubaxyada
- Geedaha dheriga lagu aburo
- Alaabaha la dubay
- Geedaha la qalajiyay





# Ogoow Inta Aad Kharash Garayn Karto

- Ka qaybgalayaasha xaqa u leh waxay heli karaan \$28 oo ah dheefaha FMNP. Waxaad arki doontaa dheefaha FMNP oo lagu daray kaarkaaga WIC hal mar xilliga (Juun 1 - Oktoobar 31).
- Ka qaybgalayaasha hela dheefaha bilaha ee Miraha iyo Khudaarta waxay ku isticmaali karaan suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha marka lagu daro dheefahooda FMNP.
- Dheefaha bilaha ah ee Miraha iyo khudaarta way kala duwan yihiin iyadoo ku xidhan tirada iyo qaybaha ka qaybgalayaasha qoyska.
- Fiiri App-ka WICShopper, oo ka fiiri “My Benefits” si aad u aragto Mirahaaga iyo Khudaartaada- FMNP iyo Qiimaha Lacagta ee Dheefaha Miraha iyo Khudaarta.



# Ogoow Sida Aad U Kharash Gareynayso Dheefahaaga FMNP

## Dheefaha FMNP:

- Ka dukaameyso kaliya suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha ee la ogolyahay inta u dhaxaysa **Juun 1-Oktoobar 31, 2023**.
- Dheefaha FMNP kuma shaqeeyaan dukaanka raashinka.
- Waxaad ku arki kartaa dheefaha FMNP ee ku qoran dheefahaaga kale ee WIC adiga oo ka eegaya App-ka WICShopper, liiska wax iibsiga ee daabacan, rasiidka dukaanka raashinka, ama weydii rugta caafimaadka WIC ee degaankaaga.

**Xusuusnoow:** Beeraleyda suuqa iyo dukaamada beeruhu ma awoodi doonaan inay ku siiyaan rasiidh.



# Ogoow Sida Aad U Kharash Gareyn lahayd Dheefahaaga Miraha iyo khudaarta

Dheefaha Miraha iyo Khudaarta:

- Waxa lagu isticmaali karaa suuqyada beeralayda iyo dukaamada beeraha laga bilaabo **Jun 1, 2023**.
- Waxa sanadka oo dhan lagu isticmaali karaa suuqyada beeralayda ee furan iyo dukaamada beeraha.
- Waxay ku qoran yihiin dheefahaaga kale ee WIC adiga oo ka eegaya App-ka WICShopper, liiska wax iibsiga ee daabacan, rasiidka dukaanka raashinka, ama weydii rugta caafimaadka WIC ee deegaankaaga.
- Waxa la isticmaalaa bil kasta inta u dhaxaysa Maalinta Koowaad ee Kharash garaynta ilaa Maalinta U dambaysa ee Kharash garaynta.

**Xusuusnoow:** Beeraleyda suuqa iyo dukaamada beeruhu ma awoodi doonaan inay ku siiyaan rasiidh.



# Ogoow Sida Ioo Isticmaalo Dheefahaaga

- Suuqa uqaado QR koodhkaaga WIC.
- Aagga suuqa beeralayda ama dukaanka beeraha, ka dooro mirahaaga iyo khudaartaada beeralayda la ogolyahay.
- Beeralayga wuxuu iskaan garayn doonaa QR koodhkaaga WIC wuxuuna aalada moobeelka casriga ah gelin doonaa cadadka iibka.
- Beeraleygu wuxuu ku tusi doonaa qiimaha lagu iibsado miraha iyo khudaarta.
- Beeralayga ayaa ku weydiin doona inaad geliso 4-ta PIN ee Kaarkaaga WIC si aad u ansixiso qiimaha iibka.
- Haddii aad hesho labada dheefood ee FMNP iyo dheefaha Miraha iyo Khudaarta, **dheefaha FMNP ayaa had iyo jeer la isticmaalaa ugu horreeya** ka hor inta aan la isticmaalin dheefaha Miraha iyo khudaarta. Haddii aad isticmaasho dheefahaaga FMNP, dheefaha Miraha iyo Khudaarta ayaa dabooli doona inta ka hartay iibka (iyadoo ku xiran baaqiga la heli karo ee dheefaha Miraha iyo Khudaarta).



*Calaamadan  
= Beeraha la  
ogolyahay*



# Ogoow Inta Aad Kharash Garayn Karto

Waxaad ku isticmaali kartaa qaddar kasta oo ah dheefahaaga FMNP suuq kasta oo beeralayda ama dukaanka beeraha ee la ogolyahay.



Tusaale ahaan: Haddii aad haysato \$28 oo ah dheefaha FMNP:

- Ku kharash garee \$4.75 hal beeraley iyo \$12.50 beeraley kale.
- Wali waxaad haysataa \$10.75 oo ah baaqiga dheefaha FMNP ee kaarkaaga WIC. Waxaad ku isticmaali kartaa baaqigaan suuqa beeralayda ama dukaanka beeraha wakhti kasta ka hor Oktoobar 31keeda.

**Xusuusnoow:** Ma u isticmaali kartid dheefahaaga FMNP ama dheefahaaga Miraha iyo khudaarta si aad suuqa uga iibsato waxyaabo kale, ku bixiso cuntooyinka aan la oggolayn, ama aad ku hesho lacag caddaan ah.

# Ogoow Inta Aad Kharash Garayn Karto



Tusaale ahaan:

Waxaad booqataa dukaanka beerta. Waxa kaarkaaga WIC kuugu jira \$10.75 oo ah baaqigaaga FMNP.

Waxaad doorataa miro iyo khudaar oo qiimahooda yahay \$12.00

- Baaqiga \$10.75 FMNP ee kaarkaaga WIC ayaa la isticmaali doona marka hore.
- Tani waxay ku raacinaysa \$1.25 oo uu weli kugu leeyahay beeraleyda.
- \$1.25 si toos ah ayaa looga jari doonaa dheefahaaga Miraha iyo Khudaarta. Wax tallaabo dheeraad ah lagama baahno beeraleyda ama adiga si loo jaro \$1.25-ka.

**Dheefaha waxaa marka hore xisaabta laga jaraa dheefaha FMNP ka dibna dheefaha Miraha iyo khudaarta**

# Tallooyin ku saabsan Wax soo saarka ee Dheefaha Miraha iyo Khudaarta

Waxaad isticmaali kartaa dheefahaaga Miraha iyo Khudaarta sanadka oo dhan:

- Suuqa beeralayda iyo dukaamada beeraha la ogolyahay ee leh QR koodka WIC iyo
- Dukaamada raashinka adiga oo galinaya WIC Card.

Haddii aadan u isticmaalin dheefahaaga Miraha iyo Khudaarta suuqa beeralayda ama dukaanka beeraha, u isticmaal dheefaha dukaanka raashinka alaabta aan loo ogolayn dheefaha FMNP, sida:

- Miraha iyo khudaarta barafaysan
- Liinta, cananaaska, ama wax soo saarka kale ee aan deegaanka ka bixin



# Caawimaad

## Caawinta ku saabsan QR koodhka WIC:

- Wac: 1-800-841-1410
  - Taabo 3, kadib taabo 2
- Haddii kaadhkaaga WIC, oo leh istiikarka QR koodhka, uu lumo ama la xado, la xidhiidh rugtaada WIC isla markiiba.

## Si Aad U Eegto Baaqiga Dheefahaaga:

- Isticmaal App-ka WICShopper
- Dib u eeg liiska wax iibsiga ee daabacan
- Waydii shaqaalaha WIC wakhtiga ballanta
- Eeg rasiidka dukaanka raashinka
- Wac 1-844-359-3104 (dhabarka danbe ee Kaarka WIC)





**Ku raaxayso  
dhadhankaaga  
miraha iyo khudaarta  
cusub!**

**Ku raaxayso  
khibradaada  
suuqyada  
beeralayda ama  
dukaamada beeraha.**



Waad ku mahadsan tahay dib u eegista  
sawiradan.



Si aad dukumiintigaan ugu heshid qaab kale, wac 1-800-841-1410. Haddii aad tahay macaamiil dhagool ah ama aad maqal culus tahay, fadlan wac 711 (Washington Relay) ama iimayl udir [WIC@doh.wa.gov](mailto:WIC@doh.wa.gov)

DOH 964-025 March 2023 Somali